SUNDHEDSSTYRELSEN

STATENS SERUM INSTITUT

Bixinta tallaalka ka dhanka ah COVID-19

Akhti warqaddan ku qoran **Ingriisiga**, **Turkiga**, **Carabiga**, **Soomaaliga**, **Urduuga** iyo luqaddaha kale xaga bogga **www.sst.dk/vaccinationsbrev**

Ka hel hagitaanka iyo lambarka telefoonka khadka tooska ah wixii ku saabsan tallaalka ku lidka ah COVID-19 ee ku qoran luqaddaha aan Dheenishka ahayn bogga **www.coronadenmark.dk**

Waxaa hadda lagaa tallaali karaa COVID-19.

Madaxda caafimaadka Daanishku waxay ku talineysaa in la iska tallaalo COVID-19 sababtoo ah waxay bixisaa ilaalinta sare ee ku lidka ah inaad qaaddo caabuqa oo aad la xanuunsato COVID-19.

Markasta oo ay badato dadka la tallaalayo, ayaa si fiican ayaan u xakameyn doonnaa faafida saf-mareenka.

Tallaalku waa lacag la'aan, waana ikhtiyaari inaad aqbasho tallaalka lagu siinayo tallaalka iyo in kale.

Waa inaad qabsataa ballantaada si laguu tallaalo

Waa inaad qabsataa ballantaada tallaalka addoo soo gelauaya **www.vacciner.dk** oo isticmaalaya kaaga NemID. Halkan waxaad ku arki kaartaa qaybaha wakhtiyada iyo halka lagaa fallaali karo gudaha Denmark.

Waa in lagu tallaalo labba jeer si aad u gaadho saamaynta tallaalka wanaagsan. Markaad qabsato ballan, waa inaad sidaas awgeed qabsataa ballanka labbadaba tallaalka koowaad iyo tallaalka labbaad.

Dhammaan kuwan lagu marti qaaday waxay haystaan fursadda in la tallaalo. Haddii aanad ka heli karin qaybta wakhtiga bogga **www.vacciner.dk**, waxaanu ku talinaynaa inaad isku daydo mar dambe. Qaybaha cusub ee wakhtiyada si joogta ah ayaa loo soo geliyaa. Tirada qaybta wakhtiyada waxay ku xidhnaan doonaa inta uu yahay tallaalka Denmarka ay hesho wakhtiga su'aashu taagan tahay.

Miyaad haysaa wax su'aalo ah oo ku saabsan tallaalka?

Waxaad macluumaadka kale dhexdiisa akhriyi kartaa wax ku saabsan sida laguu tallaali karo, cida tallaalka loo ansixiyay iyo sida uu waxtar u leeyahay iyo sida uu waxtar u leeyahay warsidahan: *Tallaalka ku lidka ah COVID-19*

Haddii aanad hubin wax ku saabsan haddii aad qabto wax xasaasiyado ah oo la macno ah inaanad u adkaysan tallaalka, waxaad ka akhriyi kartaa wax badan **halkan** ama la xidhiidhi kartaa dhakhtarkaaga.

Haddii aad u baahan tahay inaad qabsato ballanta tallaalka

Haddii aad u baahan tahay qabsashada ama beddelka ballantaada, Gobolkaaga ayaa ku caawin kara. Waxaad ka heli kartaa halka lambarka tooska ah bogoska hoose.

Gobolka Caasimada Denmark **Tel. 45 38 66 00 00**	Maalmaha todobaadka 08:00-17:00 Dhammaadka todobaadka 08:00-16:00
Gobolka Zealand **Tel. +45 70 20 42 33**	Maalmaha todobaadka iyo dhammaadka todobaadka iyo 09:00-12:00 iyo 13:00-19:30
Gobolka Koonfurta Denmark **Tel. 45 99 44 07 17, press 1**	Maalmaha todobaadka iyo dhammaadka todobaadka 08:00-18:00
Gobolka Dhexe ee Denmark **Tel. 45 70 23 24 15**	Maalmaha todobaadka 08:00-19:00 Dhammaadka todobaadka 09:00-17:00
Gobolka Waqooyiga Denmark **Tel. +45 97 64 84 63**	Maalmaha todobaadka 08:00-17:00 Dhammaadka todobaadka 08:00-15:30

Dhakhtarkaaga, sundhed.dk iyo laynka tooska ah ee qaranka ee korono fayraska ma arki karaan taariikhaha la heli karo, wakhtiyada sugitaanka, qabso ballantaada ama beddel ballantaada.

Riix **halkan** wixii macluumaad ah ee ku saabsan tallaalka COVID-19 oo Ingiriisi ah.

Gaadiidka ku socda xarunta tallaalka

Haddii aanad awoodin inaad timaado xarunta tallaalkaaga iskaa ama iyaddoo uu ku caawinayo qaraabadu sababtoo ah waxaad qabtaa liidashada joogtada ah ee jidhka ama shaqada maskaxda oo liidata, waxaad la soo xidhiidhi kartaa degmadaada. Waxay kaa caawin kartaa gaadiidka. Haddii aad u baahan tahay caawimada gaadiid raaca, degmadda waxay sidoo kale kaa caawin doontaa inaad qabsato ballanta tallaalka.

Waxaad sidoo kale wici kartaa khadka tooska ah ee COVID-19 ee 45 70 20 02 33 wixii macluumaadka ku saabsan sida loola xidhiidho degmadaada.

Adiga qofka ka yar da'da 18

Go'aanka in lagaa tallaalo COVID-19 adigaa iska leh. Sababtoo ah da'daadu waxa weeye 18, waalidkaaga (waalidka ilaaliyaha ah) waa in lagu wargeliyaa inaad heshay marti qaadka in lagu tallaalo. Waalidkaagu sidaas awgeed guud ahaan waxa uu heli doonaa nuqulka warqaddan. Ka dib waxaadka hadli kartaa wax ku saabsan, oo way ku raaci karaan marka lagu tallaalayo.

Waa fikrad kuu wanaagsan adiga inaad la hadasho waalidkaaga ka hor tallaalkaaga. Haddii aad iskaa u timaado tallaalkaaga, waxaa lagu waydiin karaa haddii aad kala hadashay waalidkaaga, oo waxaa lagu waydiin doonaa inaad soo wacdo iyaga oo aad kala hadasho iyaga wax ku saabsan bixinta tallaalka.

Haddii waalidkaagu ay doonayaan macluumaad badan oo ku saabsan tallaalka, waxaad ka heli kartaa bogga.: **www.sst.dk/da/corona/Vaccination**

Kii daacada kuu ahaa,

Henrik Ullum
Sarkaalka Madaxa hawl fulinta
Statens Serum Institut

Søren Brostrøm
Madaxa Srkaalka Fulinta
Masuuliyiinta Caafimaadka Dheenishka

corona | covid-19

Vaccination COVID-19

Macluumaadka ku saabsan habbaynta xogtaada gaarka ah

Halkan waxaad ka heli doontaa macluumaad ku saabsan sida Statens Serum Institut xogta gaarka ah sida ay u habbayso wax ku saabsan ee la xidhiidha barnaamijka wareejinta tallaalka wixii ah korona fayraska/COVID-19.

Akhri wax badan oo ku saabsan xogta la habbeeyay.

1. Waxaanu nahay maamulayaasha xogta -- sideed noogula soo xidhiidhaa?

Statens Serum Institut (SSI) waa maamulaha xogta ee habbaynta xogta gaarka ah ee aanu kuuhayno adiga. Waxaad ka heli kartaa faahfaahintayada xidhiidho hoos.

Statens Serum Institut Artillerivej 5 DK-2300 København S
Lambarka CVR.: 46837428
Tel. +45 32683268
Iimayl: serum@ssi.dk

Had iyo jeer waxa alagugu soo dhawaynayaa inaad la xidhiidho shaqada DPA bogga compliance@ssi.dk ama telefoonka +45 4046 0083 haddii aad qabto wax su'aalo ah oo kale oo ku saabsan nidaamyada SSI xogtaada gaarka ah.

Fadlan la xidhiidha SSI addoo maraya e-Boks haddii aad qabto wax su'aalo ah oo ku saabsan xuquuqdaada. Waxaad ku heli karaa macluumaadka (af Dheenish) ku saabsan sida loo isticmaalo e-Boks websaydka *Sikker kommunikation med SSI* (Secure communication with SSI) (**www.ssi.dk/om-ssi/kontakt/sikker-kommunikation-m-ssi**).

2. Ujeedada habbaynta xogtaada gaarka ah

Waxaanu habbaynaa xogtaada gaarka ah wixii ah ujeedooyinka bixinta tallaalka iyo habbaynta nidaamyada tallaalka ee kooxaha yoolka ah ee la doortay iyo ka warhaynta aqbalaada dad waynaha iyo saamaynta tallaalka iyo baadhida wixii dhimasho ah dhexda tallaalka iyo falcelinta aan la filayn ama saamaynta xun ee tallaalka. Qaybtan hawlaha SSI sidii masuulka dad waynaha iyo dedaal kayaga si looga hortaggo oo loola socdo faafida koronofayraska/COVID-19.

Qayb ka mid ah habbaynta waxaa loo sameeyay cilmi baadhid iyo ujeedooyinka tirakoobka oo keliya.

3. Kaydka xogtaada gaarka ah

Waxaanu kaydinaa xogtaada gaarka ah wakhtiyada la ururso si loo awoodo in lagu siiyo tallaalka/loo dejiyo nidaamka tallaalka iyo in laga warhayo tallaalka heerka guud ahaaneed. Xogtaada gaarka waa la kaydin doonaa ilaa aanay in dheeraad ah la xidhiidhin SSI inay bixiso oo la socota tallaalada. Suuragal maaha in la bixiyo wakhtiga gaar ah tan. SSI si joogta ah waxay uga fekeri doontaa baahida habbaynta oo waxay baabiin doontaa ama magaca qarin doontaa xogta gaarka ah marka habbaynta aan in dheeraad ah loo tixgelin inay lama huraan tahay.

Haddii aad qabsho soo jeedintan, xogtaada tallaalka waxaa lagu baabiin doonaa labba sanadood ka dib dhimashadaada si waafaqsan sharciyada kaydka Amarka Fulinta lambarka 1615 ee 18 Diisambar 2018 ee heli iyo diiwaan gelinta iwm, ee alaabta dawada iyo xogta tallaalka. Waxaad wax badan ku akhriyi kartaa (af Dheenish) oo ku saabsan kaydka iyo habbaynta xogtaada gaarka ah gudaha Diiwaanka Tallaalka Dheenishka halkan: **www.ssi.dk/om-ssi/persondatapolitik**, hoosta taabka *Er du blevet vaccineret?* (Miyaa lagu tallaalay?)

4. Qaybaha xogta gaarka ah iyo oggolaanshaha sharciga ee habbaynta xogta gaarka ah

Waxaanu habbaynaa qaybaha soo socda ee xogta gaarka ah ee kugu saabsan adiga ee ku jira Diiwaanka Tallaalka Dheenishka:

Xog caadi ah, oo aan xasaasi ahayn oo gaar ah
- Magaca
- Cinwaanka
- Kooxda caymiska cqaranka
- Lambarka adeeg bixiyaha daryeelka caafimaadka dhakhtarka
- Lambarka gobolka

Xogta gaarka ah ee qarsoon, ee caadiga ah:
- Lambabrada diiwaangelinta madaniga ah (CPR)

Xog caadiga ah ee gaarka ah:
- Xogta caafimaadka xaqiijinaysa in lagu talaalay.

SSI waxay sidoo kale habbayn doontaa wax ku saabsan, tusaale ahaan, cudurada qarsoon iyo xaaladaha shaqada lama huraanka u ah SSI si loo aqoonsado haddii aad ku dhex jirto kooxaha la bartil maameedsanayo ee tallaalka la siinayo. SSI sidoo kale waxay isticmaashaa xogta si ay u awoodo inay qabato hawlaha ka warhaynta aqbalaada dad waynaha iyo saamaynta tallaalka iyo baadhitaanka dhimasho kasta dhexda tallaalka iyo falcelinta aan la filayn ama saamaynta xun ee tallaalka.

SSI waxay habbayn kartaa xogtan gaarka ah marka ay lama huraan u tahay inay awoodo inay bixiso tallaalka COVID-19, arag Amarka Fulinta lambarka 146 ee 1 Febraayo 2021 habaynta xogta gaarka ah ee la xidhiidha bixinta tallaalka ku lidka ah COVID-19.

SSI waxay ka masuul tahay ka warhaynta iyo la dagaalanka faafida cudurada iyaddoo lala shaqaynayo baaqiga adeega caafimaadka dad waynaha, iyo ka warhaynta iyo qiimaynta aqbaladaada dad waynaha iyo saamaynta tallaalka iyo baadhitaanka dhimasho kasta dhexda tallaalka iyo fal celinta aan la filayn ama saamaynta xun ee tallaalka, arag qaybta 222 ee Xeerka Caafimaadka Dheenishka (*Sundhedsloven*)[1] iyo, wiixii faahfaahin dheeraad ah, qaybta 157a(6) Xeerka Caafimaadka Dheenishka. SSI sidoo kale waxay ka masuul tahay diiwaangelinta xogta muwaadinka gaarka ah ee tallaalada iyo xogta la xidhiidha Diiwaanka Tallaalka Dheenishka, araga qaybta 157a ee Xeerka Caafimaadka Dheenishka.

Sidaasna waxaanu habbaynaa xogtaada gaarka ah si waafaqsan Qodobka 6(1))e) ee Sharciga Ilaalinta Xogta Guud [2], sida habbaynta ay lama huraanka u tahay ee wax qabadka hawsha lagu fuliyay danta guud ama ku dhaqanka masuuliyiinta sarkaalka awood loogu siiyay gudaha SSI iyo Qodobka 9(2)(h) iyo (i) Sharciga Ilaalinta Xogta Guud, maadaama habbaynta ay lama huraan u tahay ujeedada maaraynta ee caafimaadka ama nidaamyada daryeelka bulshadda iyo adeegyada iyo wixii ah asbaabaha danta guud ee aaga ee caafimaadka dad waynaha.

Waxaanu habbaynaa diiwaankaaga madaniga (CPR) lambarka si waafaqsan qaybta 11(1) ee Xeerka Ilaalinta Xogta Dheenishka (*Databeskyttelsesloven*)[3], maadaama ay lama huraan u tahay inay awood noo siiso inaga inaanu kuu aqoonsano si cad.

[1] Lambarka Xeerka Isku darka. 903 ee 26 Ogosto 2019 si la isugu daro Xeerka Caafimaadka Dheenishka sida wax laga beddelay.

[2] Sharciga (EU) 2016/679 ee Baarlamaanka Yurub iyo ee Gollaha ee 27 Abriil 2016 ee ilaalinta shakhsiyaadka dabiciiga ah ee ku saabsan habbaynta xogta gaarka ah iyo dhaqdhaqaaqa xorta ah ee xogtaas, iyo tirtirida Tilmaanta 95/46/EC (Sharciga Ilaalinta Xogta Gaarka ah) (Qoraalka wata ku habboonaanta EEA).

[3] Xeerka lambarka Dheenishka lambar 502 ee Maayo 2018 ee ku saabsan shuruudaha kaabiida Sharciga (EU) ee ilaalinta dadka dabiiciga waxa ku saabsan habbaynta xogta gaarka ah iyo dhaqdhaqaaqa xorta ah ee xogtan.

5. Isha xogta gaarka

Waxaanu helnay macluumaad ku saabsan lambarkaaga CPR ee ka yimid Diiwaanka CPR iyo macluumaadka ku saabsan magacaaga, cinwaanka, qaybta caymiska caafimaadka qaranka, lambarka dhakhtarka daryeel bixiyahaaga caafimaadka iyo lambarka gobolka ee ka yimid Masuuliyiinta Xogta Caafimaadka Dheenishka (*Sundhedsdatastyrelsen*). Waxaanu sidoo kale helnay xog dheeraad ah oo ku saabsan adiga, tusaale ahaan da'da iyo sinjiga, ka yimid diiwaanada dad waynaha, ay ku jiraan Diiwaanka CPR.

Halka la xidhiidha, waxaanu sidoo kale helnay xog kale oo adiga kugu saabsan, tusaale ahaan ku saabsan xaaladaha raaga iyo cudurada siiba xaalada shaqada, ka timid diiwaanada dad waynaha, ay ku jiraan Diiwaanka Bukaanka Qaranka (Landspatientregistret), Diiwaanka Cudurada Raaga ee La doortay iyo Cudurada Maskaxda aadka u Daran (RUKS), Wakaalada Dheenishka ee Suuqa Shaqada iyo Shaqaalaynta (STAR) diiwaanka DREAM iwm.

Si la xidhiidha ka warhaynta aqbalaada dad waynaha iyo saamaynta siiba bandhiga daraasadaha la xidhiidha badbaadada tallaalka, SSI sidoo kale waxay eegtaa natiijooyinka baadhitaan kasta oo COVID-19 ah.

6. Helayaasha ama qaybaha helayaasha

SSI waxay u shaacisaa xogtaada gaarka ah Gobolka aad ku nooshahay ilaa labbada sababood: 1) si ay awood kuugu siiso inaad hesho tallaalka, iyo 2) ee tallaalka si loogu diiwaangeliyo diiwaanadaada bukaanka iyo Diiwaanka Tallaalka Dheenishka.

Gobolkaaga ama dhakhtarkaaga guud waxa uu ka masuul yahay diiwaan gelinta iyo ka warbixinta tallaalada gudaha Diiwaanka Tallaalka Dheenishka. Fadlan la xidhiidh dhakhtarkaaga guur ama Gobolkaaga, haddii aad doonayso inaad ogaato wax badan oo ku saabsan dhakhtarkaaga guud ama Gobolka habbayntooda xogta gaarka ah. Waxaad ka heli kartaa faahfaahinta xidhiidhka Gobolkaaga halkan:

Gobolka Waqooyiga Denmark	**www.rn.dk**
Gobolka Dhexe ee Jutland	**www.rm.dk**
Gobolka Koonfurta Denmark	**www.regionsyddanmark.dk**
Gobolka Zealand	**www.regionsjaelland.dk**
Gobolka Caasimada Denmark	**www.regionh.dk**

SSI sidoo kale waxay u shacisaa xogtaada Wakaalada Dawooyinka Dheenishka (*Lægemiddelstyrelsen*); tani waxay lama huraan u tahay si ay awood u siiso Wakaalada Dawooyinka Dheenisha inay qabtaan hawshooda ka warhaynta iyo badbaadada tallaalka, ay ku jiraan saamaynta xun. Waxaad kala soo xidhiidhi kartaa Wakaalada Dawaooyinka Dheneiska bogga **www.lmst.dk** haddii aad doonayso inaad ogaato wax badan oo ku saabsan Wakaalada habbaynteeda xogtaaada gaarka ah.

SSI waxay u shaacisaa xogtaada gaarka ah habbeeyayaashyada xogta, ay ku jiraan Masuuliyiinta Xogta Caafimaadka Dheenishka. Waxaanu gelinay heshiisyada habbaynta xogta ee habbeeyayaasheena xogta iyo kormeerida habbeeyayaasha xogta u hogaansan heshiisyada habbaynta xogta si waafaqsan sharciyada ku habboon.

7. U wareejinta helayaasha wadama saddexaad ah, ay ku jiraan ururada caalamiga ah

Uma gudbin doono xogtaada gaarka ah helayaasha dibada ka ah Midowga Yurub iyo EEA.

8. Xuquuqdaada

Si waafaqsan Sharciga Ilaalinta Xogta Guud, waxaad leedahay tiro xuquuqda ah oo la xidhiidh habbayntaada xogta gaarka ah. Haddii aad doonayso inaad ku dhaqanto, fadlan nala soo xidhiih.

Haddii xogta gaarka keliya waxaa loo habbeeyaa ujeedooyinka cilmiga iyo tiro koobka, waxaa jira tiro xayiraado ah oo ku saabsan mowduucyada xogta waafaqsan Sharciga Ilaalinta Xogta Guud. Tan macnaheedu waxa weeye ma lihid xaqa aad ku soo gasho, xaga wargelinta, xaqa xayiraada habbaynta, xaqa aad ku diido iyo xaqa tirtirida ee xogta gaarka ah ee ku saabsan adiga oo qayb ka ah habbayntan. Xayiraadaha xuquuqdaadu waxay ka timaadka qaybta 22(5) ee Xeerka Ilaalinta Xogta Dheenishka iyo Qodobka 17(3)(d) ee Sharciyada Ilaalinta Xogta Guud.

Xaaladaha kale, waxaad leedahay xogta soo socota, taas oo ay dhici karto, si kastaba ha ahaatee, sidoo kale waxay hoos timaadaa xayiraado:

Xaqa in la arko xogta (xaqa gelida)
Waxaad xaq u leedahay inaad soo gasho xogta aanu habbayno ee kugu saabsan adiga sida tirada xogta kale.

Xuquuqda sixitaanka (sixid)
Waxaad leedahay xaqa aad ku haysato xog aan sax ahayn oo adiga kugu saabsan in la saxo.

Xaqa tirtirida
Xaaladaha gaarka ah, waxaad leedahay xaqa aad ku haysato xog ku saabsan mid aad tirtirtay ka hor wakhtiga guud ahaan waajib ay nagu tahay tirtirida xogta.

Xaqa xayiraada habbaynta
Xaaladaha qaarkood, waxaad leedahay xaqa inaad haysato habbayntayada sharciga ah ee xogtaada gaarka ah ee la xayiray. Haddii aad leedahay xaqa in habbayntaada lagu xayiro, waxa dhici karta, mustaqbalka, keliya inaanu habbayno xogta -- aan ahayn kaydka -- wata oggolaanshahaaga ama dhisida, ku dhaqanka ama difaaca sheegashooyinka sharciga ah ama ilaalinta xuquuqda mid kale oo dabiici ahaan ama qof sharci ah ama sababaha danta guud ee dad waynaha ee muhiimka ah.

Xaqa in la diido
Xaaladaha qaarkood, waxaad leedahay xaqa aad ku diido haddii kale habbayntayada sharciga ah ee xogtaada gaarka ah.

Waxaad akhriyi kartaa wax badan oo ku saabsan Wakaalada Ilaalinta Xogta Dheenishka hagaheeda xuquuqda xogta oo aad ka heli karto bogga **www.datatilsynet.dk**.

Fadlan la xidhiidha SSI addoo maraya e-Boks haddii aad qabto wax su'aalo ah oo ku saabsan xuquuqdaada. Waxaad ku heli karaa macluumaadka (af Dheenish) ku saabsan sida loo isticmaalo e-Boks websaydka *Sikker kommunikation med SSI* (Secure communication with SSI) (**www.ssi.dk/om-ssi/kontakt/sikker-kommunikation-m-ssi**).

9. Faahfaahinta xidhiidha Sarkaalkayaga Ilaalinta Xogta

Haddii aad qabto wax su'aalo ah oo ku saabsan habbaynta xogtaada, waxaa had iyo jeer lagugu soo dhawaynayaa inaad la xidhiidho Helle Ginnerup-Nielsen, Sarkaalkayaga Ilaalinta Xogta ee Wasaarada Caafimaadka Dheenishka iyo Wasaarada Dheenishka ee Arrimaha Bulshadda iyo Muwaadiniinta Sare.

Waxaad kula xidhiidhi kartaa Sarkaalkayaga Ilaalinta Xogta qaababka soo socda:
Iimayl ahaan: **databeskyttelse@sum.dk**
Warqad: Holbergsgade 6, DK-1057 København K, attn. Sarkaalka Ilaalinta Xogta (databeskyttelsesrådgiver)

10. Cabasho u soo gudbinta Wakaalada Ilaalinta Xogta Dheenishka

Waxaad xaq u leedahay inaad cabasho u soo gudbiso Wakaalada Ilaalinta Xogta Dheenishka (*Datatilsynet*) haddii aanad ku qanacsanayn qaabka aanu u habbayno xogtaada gaarka ah. Waxaad ka heli kartaa faahfaahinta xidhiidhka Wakaalada Ilaalinta Xogta Dheenishka bogga **www.datatilsynet.dk**.